



## GO'AAMADII SHIRWAYNIHII GUUD EE URURKA OYSU

SANA DIEGO, CALIFORNIA 2013

Waxaa gobalka California magaaladiisa San diego ee carliga maraykan ka socday shirwaynihii labaad ee ururka Midowga Dhalinyarada iyo Ardayda Ogaadeeniya, ee afka qalaad loogu yeedho "Ogaden Youth & Students Union" (OYSU). Waxaana kasoo qaybgalay xubnaha ururka ee aduunka dacadadiisa, xubno ka kala socday Jaaliyadaha Ogaadeeniya, Marti sharaf, iyo waliba Madaxda Jabhada Wadaniga Xoreynta Ogaadeeniya (JWXO). Shirwaynaha oo socday bishan 22-27 keedii ayaa wuxuu Maalinimadii Axada, kusoo gabagaboobay guul wax ku ool-ah. Shirwaynaha oo bilowday maalinimadii Arbacada, ayaa wuxuu sadexdii maalmood ee ugu horeeyay albaabadu u xidhnaayeen xubnaha ururka iyo madaxda JWKO, oo uu horkacay G/Kuxigeenka Jabhada Wadaniga Xoraynta Ogadeniya "JWXO" Dr. Mohamed Ismail. Hadaba, Go'aamadii iyo qodabadii la isku raacay shirwaynaha ayaa la filayaa in dhamaan ururwaynaha OYSU faracyadiisa kala duwani ku hawlgalidoono mudada sadex sano ee soo socota. Qodobadaas ayaa waxaa ka mid ah:-

1. Kadib markii la qiimeeyay warbixinadii ururhoosaadyada iyo waxqabadkii guud ee ururka OYSU labadaba, waxaa la isku waafaqay in dhamaan qorshayaashii ururku u fuleen sidii loogu talo galay sadexdii sano ee lasoo dhaafay.
2. Waxaa shirwaynaha lagu dajiyay laguna ansixiyay qorsho sanadeedkii ururwaynaha OYSU ee mudada sadexda sano ee foodo inagu soo haya.
3. In lasii xoojiyo arimaha abaabulka (Advocacy) iyo xuquuqul insaanka, oo la isku afgartay in waxbadan uu ururku ka qabtay mudadii uu shaqaynayay.
4. Waxaa kale oo la ansixiyay in ururku dadaalkiisa waxqabad sii laban-laabo, waxna laga qabto baahida caruurta agoonta ah ee qaxoontiyada ku tabaalaysan.
5. Xoojinta iyo adkeynta midnimada ururka Dhalinyarada iyo Ardayda Ogaadeeniya (OYSU).
6. In kor loo qaado aqoonta dhalinyarada u dhalatay Ogaadeeniya, laguna baraarujiyo gumaysiga madow, ee sababay tacadiyada, iyo xadgudub yada ka dhan ka'ah xuquuqul insaanka, ee sida joogta'ah uga dhaca wadanka Ogaadeeniya.

7. Taageerida, Xoojinta iyo garab istaaga halganka xaqa ah ee umada Soomaalida Ogaadeeniya ugu jirto helida xornimo buuxda, kaas oo ay hogaaminayso Jabhada Wadaniga Xoraynta Ogaadeeniya (JWXO).
8. Waxaa lagu doortay Xoghayaha Guud ee ururka, kaas oo dib loogu doortay mudo sadex sano ah inuu sii hogaamiyo ururka, Mudane Mujaahid Sh. Ibraahim Abdalla.

#### **BAAQ**

Wuxuu shirwaynuhu ugu baaqayaa dhamaan bulsho waynta reer Ogaadeeniya in taageero buuxda oo hiil iyo hooba ay la garab istaagaan halganka xaqa ah ee loogu jiro in lagu soo dhiciyo xaqa shacabka Ogaadeeniya ee ay hogaaminayso Jabhada Wadaniga Xoraynta Ogaadeeniya (JWXO), una midoobaan gumaysiga madow ee Itoobiya, kaas oo shacabka reer Ogaadeeniya u gaystay xadgudubyo aan lasoo koobi karin, sida kufsiga, xidhayga, dhaca, jidhdilka, IWM. Sidoo kale wuxuu shirwaynuhu ugu baaqayaa dhamaan dhalinyarada reer Ogaadeeniya meelkasta oo ay aduunka joogaan inay u hiiliyaan umada tabaalaysan ee reer Ogaadeeniya, maadaama ay dhalinyaradu tahay codka, cududa iyo aqliga bulshada, iyaga oo ka faa'iidayanaya wadamada casriga'ah ee ay ku dhexnoolyihiin.

#### **CAMBAAREYN**

Shirwaynaha ururka Dhalinyarada iyo Ardayda Ogaadeeniya (OYSU) wuxuu cambaareynayaa xadgudubyada iyo falalka foosha xun ee ka dhanka'ah xuquuqul insaanka iyo sharciyada caalamka ee uu gumaysiga Itoobiya kula kacay shacabka dulman ee reer Ogaadeeniya. Waxaan sidoo kale cambaareyn dusha uga tuureynaa inta gacan ku siinaysa dulmigaas ay gumaysiga Itoobiya ugaysanayso shacabka Ogaadeeniya iyaga oo fulinaya rabitaanka gumeysiga.

Midnimo, Mintid, Isku tashi, Guul,  
Allahu Akbar,

**Shirwaynihii Guud ee Ururka OYSU,  
San diego, California 2013**